

Sida lagu garto barrafoobidda jirka:

Barrafoobidda maqaarka sare oo keliya ah:

- ❖ jirka waxaa ka taga dareenka oo wuxuu noqdaa caddaan, wuuna bararraa
- ❖ jirku wuxuu yeeshaa xannuun sidii in wax lagu mudmudayo oo kale ah
- ❖ jirku wuxuu yeeshaa finnan biyo ku jiraan

Barrafoobidda jirka hoos u gasha:

- ❖ jirku wuxuu noqdaa caddaan isku jirjira / midabka dambaska oo buluug ku jiro
- ❖ marka la taabto jirka, waxaa la dareemaa inuu jirku adayg noqday
- ❖ jirku bilowga hore dareen ma laha, laakiin marka dambe wuxuu yeeshaa xannuun (xannuun dekaamaya)
- ❖ jirku wuxuu yeeshaa finnan dhiiggaya

Way fiican tahay inaad og tahay

Markuu qabow jiro, madaxu haddii uu qaawan yahay, qofka jirkiisa kulaylka ku jira 80 % wuxuu ka baxaa madaxa.

Isticimaal sharabaaddo iyo kabo qallallan iyo dhar holofholof ah.

Markay hawo qabow jirto, xasuuso inaad dhaqdhaqaaqiso gacmaha iyo lugaha farahooda iyo suulashooda.

Sida hadda la og yahay, isticimaalidda kereemka barrafoobiddu waxay sii kordhisaa inuu qofku si fudud u barafobo.



Waxaa qoray:

Mari Lantto
Eveliina Ruokamo
Minna Sipola

Macadka waxbarashada cilmiga
arrimaha bulshada iyo
caafimaadka ee Oulu,
barnaamijka waxbarashada
ee daryeelka hore

Sawirka jeldiga:

Tomi Haarala


OULU

Elinkeino-, liikenne- ja
ympäristökeskus

Vipuvoimaa
EU:lta
2007-2013

Euroopan unioni
Euroopan sosiaalirahasto

Kala talinta barrafoobidda oo loogu talagalay dadka waddanka u soo guurey



Xarunta waxqabadka ee caalamiga ah
(Kansainvälinen toimintakeskus)

Villa Victor
Kirkkokatu 54, PL 60
90015 Oulun kaupunki
Tel. 044 703 1674

Jiilaalka Finland

Jiilaalku waa xilliga ugu dheer xilliyada sannadka ee Finland.

Xilliga jiilaalka isbedbedelka heerkulku wuxuu noqon karaa laga bilaabo -0°C , mar marna qabawgu wuxuu gaaraa ilaa -35°C .

Jiilaalku wuxuu socdaa 3 – 6 bilood.

Barafka dhulka ku da'aa wuxuu bilowdaa Nofembar agagaarkeeda.

Xilliga jiilaalka barafka dhulka yaallaa wuxuu gaaraa ilaa hal mitir.

Gobolka Lapland wuxuu xilliga jiilaalka caan ku yahay wakhti dheer oo ilaa 4 bilood ah oo loo yaqaan wakhtiga mugdiga (kaamosaika), wakhtigaas qorrax lama arko. Wakhtiga mugdigu wuxuu bilowdaa Oktoobar-Nofembar.

Markuu qabowgu jiro hadday dabayli dhacayso, dabayshu waxay qabowga ka dhigta mid sida caadiga ah aad uga sii qabow: markuu qabowgu yahay -5°C , dabaysha xawaareheeduna yahay 10 m/s, qabowgu wuxuu noqdaa mid u dhigma -22°C .

Meelaha jirka ka midkah ee u nugul inay barafobaan:

Faraha iyo suulasha ku yaalla gacmaha iyo lugaha, dhegaha, sanko iyo dhabannada.

Sida loo leebisto xilliga jiilaalka

Waa in dhar dhowr ah la iska kor gashadaa: dharka hoose ee la xirto, dharka dhexe, dharka kore ee la gashado.

Dharka hoose ee la xirtaa waxay noqon karaan shaati gacmo dheere ah iyo surwaal lugo dheere ah oo ka samaysan nuddo artifishal ah oo ah sida kuwa diirrimaadka leh.

Dharka dhexe waa sida dhar dhogor ka samaysan ama fleece ah ama dhar ka samaysan suuf (cudbi).

Dharka kore ee la gashado waa inay ahaadaan kuwo celinaya dabaysha iyo qoyaanka oo ah maro dunta ay ka samaysan tahay aad isugu dhegsan tahay, sida dharka loo yaqaan toppavaate.

Gacmaha

- ❖ gacmogashi hoose iyo kuwo laga sii kor gashado (dhogor + maqaar)

Lugaha

- ❖ sharabaaddo (iskaalshooyin), sharabaaddo culus iyo kabo gudaha suuf ama dhogor ku leh oo hoostoodu buuran tahay. Kabuhu waa inay ahaadaan kuwo aan ciriiri kugu ahayn; waa inaad dhaqdhaqaaqin kartaa lugaha farahooda.

Maxada

- ❖ gasho koofi daboolaysa dhegaha, dhabannada iyo qadaadka (jeegada).

Dhaawacyada ay barafobiddu keento gargaarkooda degdegga ah

Sida loo daaweeyo barafobidda maqaarka sare ah:

meesha barafowdey isla markiiba kululee, tusaale ahaan wejiga kululee adigoo isticimaalaya gacmahaaga ama biyo diirran oo heerkulkoodu yahay qiyaastii 40°C . Kululaynta wad ilaa jirka midabkiisii dabiiciga ahaa di buga soo noqonayo. Meesha jirka ah ee barafowdey ha duugin (hana xoqin)!

Sida loo daaweeyo barafobidda jirka hoos u gasha:

Hubi in aanay jirin khatar keenaysa inaad haddana dib u barafowdo. Jirkaaga meesha barafowdey diiri 30 daqiiqo – 2 saacadood, adigoo isticimaalaya biyo kulaylkoodu yahay 40°C . Jirka intiisa kalana diiri. Cab dareere diirran. Dharka iska beddel oo gasho dhar qallallan oo diirran.

Meesha jirka ah ee barafowdey, markaad 30 daqiiqo diiriso, hadday dhalaali weydo ama sidii hore ka soo fiicnaan weydo, amahaddii aad ka shakido inuu jiro dhaawac oo barafobiddu ay jirka hoose u gashay, waa inaad tagtaa rugta caafimaadka.

